#Kusoo dhawoow furfurasho iyo falanqeeynta midabbada.

CMYK & RGB.

-hordhac yar hadii aan ka hormarino faalooyinka hoos ku qoran,cilmigaan kusaabsan MIDABBADA waa mid

caruurta loogu dhigo dugsiyada.

maqaalkeenan,kusaabsan Midabbada waa mid ku kooban 25 midab .

iyagaas ayaan dhexdooda damaashaadi doonaa, tamashlo iyo dalxiis , hadba midab ayaan faaqidi doonaa, waana kuwii ugu caansanaa hadii midabbo magacyadooda lasoo hadalqaado, daawashada midabbada dadka weey ku indha-daraandaraan ,lkn inaga dawga aan kusoconay kama leexan doono, dawaada midabbada iskudaran waan ka ilaalinay.

ku dheeraan meeyno faaqidaada si eeysan idhahaaga uga caajisin aqrinta qormada,

waxaa intaas dheer KANI WAA CILMI CUSUB oo weli lagu dhigin FASALLADA FARSHAXANKA.

waana cilmi qabyo ah, biloow ah, una baahan hormarin in eey ku sameeyaan macalimiinta FARSHAXANKA,SIIBA

MACALIMIINTA ,TAQASUSKOODA YAHAY, SAAFIDA

MIDABBADA & KALA SHAANDHEEYNTA
QURUXDA,SIIBA MIDABBADA QURXOON.

-duruus ku cusub degelka soomalida.

dun xariir ah baa ku dedneeyd, hadeer ayaa daaha laga rogayaa

---

ereyo somli ah laakiin duug ah ayaan adeegsan doonaa, soonooleeynta afka hooyo dartiis.

afsoomaali sahlan, aadna ufudud adeegsigiisa ayaan aad xooga usaarnay.

-tignolajiyad maqalkeda nagu cusub yahay ayaan miiska FARSHAXANKA so sareynaa

qaabka ugu quruxda badan ee loogu adeesan karo MIDABBADA ayaan isla qaabeeyn doonaa .

waxaa iga xusuusin ah qormadaan waxaa ka horeeysay maqaal dheer , kaasoo nedka aan soo gelinay cinwaankiisana ahaa .

(#maqaal.wax walba oo ku saabsan MIDABADDA.)

waxyaabo badan ayaan ku xusnay halkaas. aqriso isha soo mari hadii aadan waxba ka aqoonin midabbada.

==========

#Maqaalkan kaga hadli meeyno arin ku saabsan

AHABTEENA.

markeey noqoto hadal wada ciraab(xigmad) ah soo xulistiisa,arimahaas xooga masaarin .

-ciraabta hadii eey tahay itus ina taabsii , waan kuu heeynaa taas, qormo ahaan +muuqaal ahaan .

==========


#dadkeena qaar degdegsan ayaa jiro aanan sugi karin sheeko dheer iyo sharaxaad tiro badan kuwaas timirtooda ceeyrinka aan kusiino, yacyacoodka haku cuneen, anaga wan sugeynaa intey ka bislaneyso.


-dadka aanan degdegsaneeyn una heelan ineey aqristaan qoraaladeena maxeey heli doonaan?.


timirna waa lasiinayaa, tiinqodx lehna weeynaga helayaan.

qofkii degdegsan waxaan leeyahay, cilmiga ceeyriinka ku qaado, adiga sii sharaxo.

karso timirta, deb u hel ama u waaye nasiibkaa.


E
A
F
B
G
C
H
D


R
S
T
U
M
N
O
Q
I
J
K
L



#Qoraxda iyada ayaan iftiinka ku aragnaa.

laakiin hadii aad sitoos ah indhaha ugu aadisid, kadibna aad ka duwdid, indhahaaga waxba ma arkeeysid , kalama sooci kartid casaan iyo cagaar.

#(RGB)

RGB=

-GUDUUD

-BULUUG

-CAGAAR.

WAX WALBA OO OO KUSAABSAN SADAX DAAS MIDAB

WAXAA LOO YAQAANAA

(RGB)

MIDABBADaas sida badan waxaa loo adeegsadaa

TV yada. injineerada , soo saaro TV-yada ,4K,8K iwm.

- mobilada + PC

wax walba oo leh shaashad wax laga daawado waxeey ku shaqeeyaan (RGB) sidaan ku arki doono qeybta hoose.

-dhagax toobin saar.

bir miyaa biyo laga tuujin karaa. dahabkana waasidaas, macdanta qalinka ah & naxaasta(maar) waa sidaas intaasba lagumadarin (RGB)

[waxan isku deyeeynaa in aan qalin kuugu qeexno midabka adiga oo aanan arag weli]

isku darkooda midabka aan ka soo xulanay


-Gaduud hadii lagu nikaaxo cadaan .(gaduud+cadaan=basali/pink)

-Buluug + gaduud=Cinabi/carwaajis.

-madoow hadii lagu nikaaxo cadaan =Dambas/ midab ciiro. (gry)

-madoow hadii lagu nikaaxo Guduud=Buni/guduud buni ah.

ISKU DARKA 1+1



#GUDUUD+

-Gaduud+cadaan=basali/Pink

-Gaduud+Buluug=Cinab/carwaajis.

-Gaduud+cagaar=jaale

-Gaduud+jaale=Liimi

-Gaduud+madoow=buni

#BULUUG +

-Buluug+jaale=cagaar

-Buluug+cagaar= ?

-Buluug+madoow=?

-Buluug+cadaan=?

#CAGAAR.+

-cagaar+jaale=zeytuun carabi

-cagaar+Buluug....

-cagaar+

-cagaar+

-cagaar+



#doolsho & xalwo , cunto lagu noolaankaro matahay in mudo ah ?.

-Farshaxanka farta aan u curinay waa sidaas, marna

ma noqon karto mid buuxiso kaalinta (BTJ)

mida aan maanta adeegsano ee hantidabadan nooga baxay .

-Gudiga farta noo dooray ee noo dhigay afkeena hooyo

hoowl badan ayeey qabteen ,10,000 oo buugaag ah ayaa maanta Somalida qoreen hadii eeysan kaba badneeyn .

taas waxeey la macno tahay dhaxalkii Soomaalida ayaa halkaas ku keeydsan.qof walba oo jecel inuu la sheekeesto jiilasha dhalan doono , afka hooyo ayuu wax ku qoraa. =maal iyo maskax ayaa halkaas naga gashay.

-faakiheeysi , ahaan ayaan u alifnay fartaan , siiba waxaan

la jeclaaday DUMARKA SOOMAALIYEED

sababtoo ah aad beey ujecel yihiin midabbada, si EEysan noogu dhex caajisin midabbada ayaaniri ku mashquula xoogaa.

#cilmigaan aduunka waa ku cusubyahay SOMALI ayaa ugu horeeysay wax qaabkaan u adeegsaday MIDABBADA .

-Cilmigaan cusub , caalamka cid qaab kaan u adeegsatay hadII eeyjirto , shanfaroodle yaasha , laba lugood layaasha

kuwaas nooga horeeyay cilmigaan, iyaga haloo diiwaan geliyo .

#Qadda qoyan & mida qalalan .

inqaasta qalalan & mida qoyan maxeey kala yihiin ?.

#CMYK.

c= saayan

M= majanta

Y= yaloow

K=Key= blaak.

(CMYK= qad qoyan)

afartaas midab iyagana waxaa sida badan loo adeegsadaa

madbacada , qalabka wax lagu daabaco

sida badan dawaadda oow ku shaqeeyo waa 4 taas midab.

--

#CMYK/SOMALI AHAAN

-Baxri.

-Jaale.

-Madoow.

-Yaaquut.

-Yaaquut=majanta.

==========

#TV 4K & MIDABBADA.

-midabbada kasoo dhexmuuqdo shaashadaha waxeey lamid yihiin xisaabta, meel eey kasoo biloowdaan ayeey leeyihiin laakiin dhamaad maleh, maalin walba

culimada waxeey curiyaan midab cusub ,20,000 midabbo wax kabadan ayaa kasoo dhex muuqan karo dhalada caaqilka ah 4K.

==========

#aftahan carbeed ayaa jiray kaasoo iin ku lahaa carabka

waxaa dhib ku eheeyd inuu ku dhawaaqo xarafka (R)

hadana waxuu marwalba isku deyi jiray inuu ka fogaado adeegsida sheekooyinka lagaheli karo xafka (R).

inaga Somaali ahaan dhaqankaas waxaa leh ABWAANADA. markuu rabo abwaanka inuu ka gabyo

xarafka (Q) waxuu mar walba ka fogaadaa inuu kabaxo xeendaabka xarafka (Q)

tusaale:Abwaanka isaga oo ka gabyaayay qaafleey uma boodi karo xarafka(Y)

hadii oow ku qasbanaado waxuu adeegsadaa xeelad. laxan ayuu saaraa gabayga .

-FARSHAXANKA FARTIISA ayaan curinay , sida kuu muuqato, meelaha qaar laxan ayaan saarnay, tusaale:

DAHABI waxaan ka dhignay DHAHABI.

maxaan sidaas uyeelnay?

-laba ujeedo ayaan ka leenahay.

1-ABCD makii la curiyay culimadii somaliyeed markii eey dooranaayeen farta somaliga

waxeey israaciyeen D+H=DH.

2- in aan soo koobno, laba xaraf halkii aan kasiin leheeyn in aan siino 1 MIDAB.

Dahabi ma dhihi karno waayo xarafka (D)waxaan siinay Dambari.

#Afka hooyo waa hodan .

meelaha qaar marka loo fiiriyo waa hodon afka hooyo, meelaha qaarna waa ku liitaa.

tusaale:sheeyga aad heeysatid midabkiisA iisheeg ayaad igu tiri ,

waxaan ku iri , waa sheey leh midab Cambaruud-bislaaday, seeytuun bislaaday.

qaab ahaan dhangalawga waa kulucsan yahay (kuusanyahay)dhangalaw la kala dilaacshay dhexdiisa.ayeey isku egyihiin sheeyga aan heesto midab ahaan.

-miraha dheenka kolka eey bislaadeen,ama isbaandhees bislaaday,intaas iyo kabadan ayaa laguugu tilmaami karaa midabka JAALAHA,sarbeeb ahaan .

-Hoobaanta dhulka hooyo laga helo ayaan kaaga sheekeeynay.

#Isir ahaan waxaanahay ,Samaale(Soomaali)

samaale yahoow shan talaabo soo durug.

samawade soo dhawaaw.

Samawado gacma furan kusoo dhawoow .

-Malaayga (Kaluunka)mooradiisa maanyada waaye, dhaqan ahaana somalida waa kaluu-meysato,waana beeraleey,waana xoola dhaqato.

daliilkeeda keen hadii lagu dhaho waxaad dhahdaa, casuumaadii caasimada xamar ka dhacday 1000 sano kahor

Ibnu batuutana kasoo waramay, ujeedka eey ka lahaayeen madax-deena casuumadaas waxeey eheed

1)in jiilasha dhalan doono ogaadaan tacbashada beeraha , siiba bariiska hala beero.mooska & canbaha & cudbiga dharka laga suubiyo.

2)doon & maraakiib baan leenahay kaluun baan dabanaa, ma dhoofino laakin waan quudanaa.

3) Geel, Ari, Lo` xoolo dhaqato baa nahay , caanahooda ayaan cabnaa hilib kooda ayaan ku noolnahay.

duruusta lagala soo dhex bixi karo booqashada qoraaga ayaa sidaas ah.

-Bulshada soomaaliyeed xiligaan danbe waxeey yeelatay mad-habo kala soocan .

-mad-habta beerfalashada qeeybahooda kala gedisan.

-mad-habta ganacsiga qeybahiisa kala duwan.

--mad-habta kaluumeeysiga & ugaarashada.

--mad-habta xooladhaqashada qeeybahooda kala duwan.

qolo walba waxeey layaabtaa qolada kale.

moowduucaan ku saabsan magacyada midabbada

sida badan waxaa laga soo dhiraandhiriyay dhirta, qudaarta, geedaha iwm.

Qaamuuska midabbada qoristiisa weli waa qabyo shaqo ayaa ku socoto,ka qeeybqaado curinta magacyada midabbada, Abwaanada & afyaqaanada waa usahlantahay

helista magacyo ku haboon midabbada cusub ee suuqa kusoo kordhay.

#Sibidh & sibir maxaa farqi ah oo udhexeeyo?.

-Sibidh waa shamiinto, reer waqooyiga ayaa sidaas u yaqaaniin .

-sibir= waa sheey cagaaran aad uqaraar , asal ahaana laga sameeyay geedka dacarta oo la wershadeeyay.

#Luqada ingiriiska weey soo ergadeen ereybixinada qaar

.

-CAWL=GAZELLE

-GARANUUG = GERENUK

-Raqay/Xamar.=Tamarind.

---

goorma ayaa erey laga baaraa Qaamuuska?.

markuu eray kaa maqan yahay .

sidaas ayeey la meel joogaan bulshada aan jirid wadaaga ka nahay dhinaca afka.

suugaanteena suuban abwaan ayaa ku gabyay "jirdahiisa doondoona, diiwaano daabaca"

---

marka aan qalinka usoo qaadanay kala doorashada ereybixinada suuqa yaal,

ereygA aan qaadaneeyno waa inuu ahaadaa mid magaalada aad looga yaqaano.

tusaale, Shamiinto,ama Sibidh, waa sheey lagu sooxusuusto

sheey midab ciiro ah leh .

-Raqay ayaan qaadanay ,4 milyan oo muqdisho kunool waa yaqaanaan RAQAY.

-Kabsar caleen .ayaan tilmaamay waana cagaarkoo iftiimay.

---

waxaan jeclaan lahaa in bulshada ku wada tartanto si loo helo , FARSHAXANKA FAR UGAAR AH aadna usahlan.

qorista Farta soomaaliga waa lagu tartamay mida aan hadeer adeegsano ayaana laqaatay, qarashna lagu bixiyay.

FARTAAS aad aragtay waa qabyo shaqo ayaa ku socoto, cid walba oo kaqeeyb qaadan karto

hirgelinteeda & dhameestirkeeda, waa albaab furan .

shaqadaan waa cilmi cusub oo usoo kordhay farshaxaka inta xiiseeyso.

waxaan is leeyahay waa lagaaray xiligii, aan MIDABBADA u adeegsan leheen, BTJX.(ABCDE)

#TVga weli waa cadaan & madoow midabkiisa.

30 kii sano ee lasoo dhaafay shaqo badan ayuu qabtay shanfaroodle ina aadan .

waayeelada timaha BOOSHKA ah leh weey xusuustaan xiligii eey horfadhin jireen

TVga midabka cadaan & madoow.

ma is leedahay weli tignoolajiyada gaabis ayaa kajiro,dhanka soosaarida midabbada.

-Far midabkeeda yahay Dahabi qor hadii lagu dhaho , dawaad nuucee ah ayaad adeegsan leheeyd?.

(Powerpont+ Photoshop) ayaa ku duuban (PC) aan wax idiinkaga soo qorayo hadeer

mana lahan Qad midabkeeda Dahabi yahay , sidookale , midabka Qalinka ah .

-far dahabi ah qofkii qor is dhaho waxuu adeegsanayaa midabka JAALAHA/hurdi.

-midabka (grey=silver)

-midabka(orange=gold)

sidaas ayaa loogu adeegsadaa , waloow waayadaandanbe

tignoolajiyada aad loo hormariyay midabka dahabiga iyo midka qalinka ah dawaadiisa (inqaastiisa) kumbuyuutarada qaar weey awoodaan in eey soo saaraan qadaas. laakiin mar walba maanka halagu haayo , midabka sidA aad shaashada uga dhex aragtid noqon maayo marka ladamco in ladaabaco, siiba midabbadaan barxan.

-boosh=Midab aad u cad oo ay yeeshaan timaha,dhogorta iwm.

==========

#(Pink & Purple & Orchid) , dhamaantood aad beey iskugu egyihiin lama kala garankaro.

-gabayada waxeey leeyihiin miisaan.dalaga beerahana,qeeybna waa la miisaamaa qaarna waa la beegaa, suus & kiintaal ayaa lagu xisaabiyaa.

marka laga hadlaayo MIDABBADA , miisaanka waxuu yahay, Xeerka (HTML)

[midabb walba sumad ugaar ah ayeey siiyeen .Guduud=FF0000::::::/Buluug=0000ff]

---

taasi waa marka tignoolajiyada la dhexmushaaxayo. hadii DEEGAANka laga dhexdoono miisaan ugooni ah midabbada ,Ubaxyada+shimbiraha

+kALUUNKA+xoolaha+Bada & beriga waxyaabaha laga dhexhelo, midabbada eey leeyihiin ayaa ah miisaan lagu kala sooco midabbada.

tusaale:dhuxusha-madoow, uma eka Ubaxa guduudan,miisaanka waakaas.

inaga somali ahaan weli lama haayo Qaamuus wadar-ogol lagu yahay oo lagu cabiro MIDABBADA.

-Barbarooni jaale ah & midka cagaaran & kan guduudan , waxaan ka dhigi karnaa misaanka midabbada.

caano barxan iyo caano dhaay ah, caano danbar ah, shaah cadeeys ah waxaasoo idil waa miisaan lagu kala garto midabbada, waana wax laga helay deegaanka.

-midabbaddA asaasiga ah, cagaar, guduud, buluug, kuma koobna , midabka liimiga, iyo qaarkale oo badan waxeey noqon karaan midab asaasi ah ama midab aanan barxaneeyn.

midab walba oo deegaanka laga heli karo waa midab asaasi ah ama midab aanan barxaneeyn.

#Midabka(rinjiga) iyo dhaqanka Somlida.

wadamada reer galbeedka dumarka waxeey siiyeen midabka Xabxabi(pink)

Somalida midabkee siiyeen dumarka?

jawaab sax ah lama haayo laakiin hadii aan tooshka uqaadano dhinaca dhaqanka waxaan

aragnaa midabka HURUUDA in dumarka isleheey-siiyeen.
tusaale : hadii aad wejiga marsatid

HURUUD, waa hubaal xaaskaaga ineey dhaqtar ku geeyneeyso,

waayo dhaqan xumo ayeey kugu aragtay.

xaaskaaga dhib uma aragto hadii cilaan aad marsatid GERKA cirada yeeshay.

==========

#Gabdhaa guurlaga fishaa. marka lagaaro maalintA aad guursan leheeyd qof walba waxaa maankiisa kusoo dhacaayo , MAXAAN KU LEBISTAA.kala xulashada midabbada waa maalin lasoo xusuusto.

-Wiilka Arooska ah cilaan cagaha haloo mariyo.

dadka waa kala dhaqan gedisanyihiin , Suudaanta waqooyi kuwa reer xeebeedka ah ,Arooska

ayaa cilaanka loo mariyaa.ceebna maahan arinkaas.

halka Somalida agtooda ceebkatahay in cilaan cagaha & gacmaha loo mariyo ninka raga ah , laakiin dhaqanka ma diidana in madaxa iyo gerka cireestay cilaanka la mariyo si cirada looga dhigo casaan ama madoow.

,waxaa ceeb ah Suudaanta agtooda , gabadha in eey cilaan saarato kahor inta aanan la guursanin.

Somalida qaar ayaa neceb in eey shaash xariir ah madaxa saarato gabar aanan weligeed nina guursanin.

waxaasoo idil waa saameeynta oow nagu yeeshay midabbka hadaa nahay Bulshooyinka afrika

-Shinbirka Daa-uuska midka labka ah ayaa midab qurxoon , isaga ayaa kufaano baalasha qurxoon.

-su`aal:shinbiraha miyeey dareemaan sheeyga qurxoon?.

koleeey aniga cilmigaas magaarin, laakiin waxaan ognahay shibirkaas inuu baalashiisa quruxda badan ku shukaansi tago, uguna faano asaagiis.

-dood ayaa kasocoto culimada dhexdeeda, laakiin waa dood dhinac qura kararan , waxeey leedahay , Daanyeerka haduu arko Dahab iyo Moos is garab yaalo

Mooska ayuu qaadanaayaa Dahabka uma baahna.

xujadaas daanyeerka lagu maagay hadii aan xujo kale dul dhigno waxaan leenahay , wiil ama gabar

laba sano jir ah , Dahab iyo Nacnac halees ku garab dhigo midkuu qaato haloo fiirsado.

Daanyeer hala difaaco miyaad leedahay ?.

maya laakiin waxaan leeyahay dooda dhinac kaliya yaanan laga eegin .

Luul & Dahab, **marjaan** & Jawharad,Yaaquut & dheeman.

midwalba hadii hal kiilo lagaaga keeno,midkee ayaad qaadan laheeyd kiiladiisa?.

#Ubaxyada midabyadooda.

-afar midab ayeey kasoo farcameen midabyada aduunka .

gaduud&jaale&buluug&cagaar.

Ubaxyada sidabadan intaas ayeey kakooban yihiin

waxaa soo wehliyo cadaan & madoow.

==========

#fartaan farshaxanka loo curiyay, faa-iidadeeda.

hadii aan ka hadalno nacfiga laga helaayo,waxaa kamid ah .

midabbada oo idil ayaa lagu dhex adeegsanayaa, isha waxeey jamataa jeclaataa, kuna raaxeeysataa

midabbada isku dhafan .

-Waa farshaxankii oo la xureeyay, lahaadayna far ugaar ah , luqadiisa ayuu nagula hadlayaa farshaxanka

marka (ABCD) loocuriyo ku dhisan midabbada.

-Arrin kale oo xiiso leh oo kusoo korodhay suuqa midabada hadii aan idinla wadaago , waxeey tahay arinkaas.

Fartaan adeegsigeeda waxeey inoo suura gelineeysaa in aan ku lebisano magacyadeena , dharna ka dhigano

.waxaa macquul ah in ubadkaagA aadan magac ubixinin ,(ABC)ahaan midabbadiisa in aad iska soo eegtid marka hore.

-Farta nuucaan ah,hirgelinteeda waxaa ka imaanaayo Aadanaha in eey isfahmaan.

wiilka Shiineeska ah iyo kan Reer galbeedka ah iyo kan Afrikaanka ah dhamaantood

waxeey adeegsandoonaan MIDABBADA, JEESTO-JEEGAANTA (soft pastels) sabuurada ayeeyna ku xariiqi doonaan

(ABCD) ku qoran afka shiineeska inaad sidaas ku aqrisid ayaa suura gal ah .

yaadan fahmin luqadii laakiin waxaa meesha ka baxay sumadii eey leheed fartaas reer bariga .

Hindiga ayaa lamid ah .

#farshaxanka fartiisa iyo fahanka ubadka.

fartaan midabeeysan hadii wax loogu dhigo caruurta, in fahamkooda kobcaayo ,

cilmi baaris in lagu sameeyo ayaa fiican. caruurta hadii sidaan wax loobaro, Jeesto-jeegaanta midabbadeeda kala jaadka ah in wax loogu dhigo ilmaha ayaan soo jeedin lahaa, hadiiba qarashkaas la awoodo .(Tabaashiirtaas caafimaad ahaan ma fiicna lasocda taas. rinjigana waa kiimiko halaga fogeeyo caruurta)

#Aadanaha marhore maxeey uhirgelin waayeen FARTA nuucaan ah ?.

cid adeegsatay Farta nuucaan ah ma arkin mana maqlin intaan kawarqabo aniga.

midna waaan kasii afeeftay,

Aduunka waa mid balaaran aqoonta dultaalna waa mid balaaran ,hadii eey jireen qoom,

Midabbada qaabnuucaan ah u adeegsaday

inaan sheegi kari waayay qolodaas ,aqoondaradeeyda ayeey ku dhacday .

Aduunka waxa Buugaag laqoray qof soo wada aqriyay ma ihi,

Farshaxanka qof kufiican ma ihi, laakiin waxaan ahay qof jecel midabbada.

-farshaxan yaqaan ku takhasusay rinjiga iyo midabada, magaarin heerkaas

laakiin waxaan ahay arday fariid ah, su`aalaha oowqabo inta soo aruursado, iyagoo faahfaahsan usoo bandhigi karo macalimiinta ku hoowlan hormarinta farshaxanka.

#Ceebaha eey leedahay FARTAAN.

-Xuruufta (ABCD)aad ayeey udheertahay, 26 waa ku dhawdahay hadii dhaqanka siduu yahay loodaayo

waloow inaga xuruufta qaar aan soo gaabinay, waxaan siinay 1 sawir, sida aad soo aragtay.

-Dawaad ama qad ayaa loo baahan yahay laga suubiyo Rinjiga, midab walba qadiisa lama heli karo.

50 sano kuwii ku hoowlanaa hormarinta midabbada ayaanan weli gaarin heer eey soo saaraan midab walba.

tusaale waxaa kuugu filan midabka MACDANTA QALINKA AH qada nuucaas ah waxaa dhib ah helideeda,

sidookale qad DAHABI ah sida loo helo waa dhib.

kusiidaro , TEEBKA aan adeegsano weli fartiisa waa cadaan+ madoow.

teeb fartaan lagu adeegsan karo ayaanan jirin weli.

-Xuruufta (ABCD)aad ayeey udheertahay waxeey ku dhawdahay 26. namuunka midabka rinjiga waa in kooban

asal ahaan inta kale waa wax eey iska dhaleen isku darka ama isku qasid rinjiyo kala midabba duwan

taas waxeey kadhigantahay adiga oo heesto 1 cambe ah, 1 tufaax ah iyo 1 xabo oo basbaas ah

rabtidna inaad uqeeybiso dad kabadan 25 qofood.

taasi weey kugu adkaan doontaa , hadii aad xeelad adeegsatidna waad is furdaamin kartaa.

#haka xanaaqin midab aad necebtahay haduu magacaaga kasoo dhex muuqdo markeey noqoto qoraalka.

tusaale waxaadba necebtahay midabka GADUUDAN , magacaaga waa UGBAAD,rinji gaduudan ayaa soogelayo

magacaas. hadii ladhaho luqadkale (ABC) deeda halagu qoro magacaas laga yaabee inoowsan sooba gelin midabka gaduudan.

tusaale, Carabta midabka gaduudan waxeey uguyeeraan, AXmar, inagana, Guduud,soow uma jeedid isbedelka kudhacay?.

#Quraafaadka dadka qaar aamineen dhanka midabka.

-midabbada ayeey laba ukala qaadaan , casaan iyo Buluug, casaanka, jaalaha, Hurdiga waxaasoo idil waxeey dhahaan

waxeey tilmaamayaan kuleeyl.

Buluug & basaliga & inta soo raacdo ee isku bahda ah waxeey tilmaamayaan har-qaboow.

sheekadaas, quraafaad badan ayaa kabuuxo,qofkii kansho uhaayo karbaash hala dhaco, dhaqankaas aadka udanbeeyo.

#macquul matahay in midab dartiis aad uxanaaqdid?.

jawaabta waa haa dadka badankiis weey uxanaaqaan midabka

aawadiis, Aduunkaan aan kunoolnahay ,

Umad walba maro ayeey kor ulushay midabna waa uyeelatay , waxeeyna aamineen in midabkaas astaan iyaga lagu aqoonsado yahay rinjigaas.

Somalida 500 sano kahor midabka Hurdiga ayeey wadan jireen sida dadka qaar ku doodaan.

Rinjiga saameentaas ayuu Umadaha ku leeyahay, midabgaar ah in lacaayo halaga fiirsado .

#quraafaadka eey dadka aamineen hadii aan sii aambaqaadno.

-Midabka Dambaska waxaa lasheegay inuu utaagan yahay midab dhex-dhexaad ah dhanna lama jiro ayeey ka dhigantahay ,

tusaale hadii aan usoo qaadano , shirkada Mobillada soo saarto , Abball, boga eey ku leeyihiin Nedka

waxaa usaaran muuqaalka sare midabkaas, sidaas aan soo sheegnay ayeeyna ula jeedaa.

midabka Carwaajis isagana waxeey siiyeen dadka taajiriinta ah , shirkada YAHOO,midabkaas Cinabiga ladhaho ayaa meesha usaaran

waxeeyna ula jeedaan shirkadeena waxeey meteshaa maalqabeenada, waana sida aan aniga ufahmay.

#shacabka shiinaha iyo Somalida.

biyaha midabkooda waa madoow yihiin , arinkaas waxaa wada aaminsan Somalida badankooda iyo shacabka shiinaha,

shacabkaas shiinaha waxeey ku doodeen shan sheey ayaa jirto shan midab ayeeyna leeyihiin ,

1-Dabka, midabkiisana waa casaan.

2-Dhulka, midabkiisana waa JAALE.

3-Biyaha midabkoodana waa madoow.

4-Qoryo , midabkoodana waa Cagaar.

5-Macdan, midabkeedana waa cadaan.

---

shantaas sheey wax aanan eheeyn maba laga soo sheegin dhinacaas shiinaha, waxeey iska indha tirayaan

HAWADA, maadaama eeysan midab leheeyn cilmiga kama mid ahan ayeey dheheen. sheekadaas waxaa aaminsan

shacabkii hore ee shiinaha, laakiin jiilka cusub laga yaabee in eey waxkale aaminsan yihiin .

#imisa midab ayaa jirto aduunka?

jawaabta waxeey tahay wax aad ubadan laakiin

inta magacyadooda layaqaano waa in yar oo kooban ,

nasiib wanaagse isha weey kala sooci kartaa .

-Aduunyada dadka ku nool inbadan oo kamid ah midab walba waxuu uleeyahay magac ugooni ah laakiin somalida waa ku liidataa dhinaca magacyada midabbada u leeyihiin ,

Aduunka dadka kunool 4 indho qof leh ayaan jirin. dhamaan dadka qofwalba 2 indho ayuu leeyahay .

dadka kale maxeey ukala gartaan magacyada , MIDABBADA ,somlidana ukala garan la dahay.

waa su`aal jawaab ubaahan.

-intA aan xiiseeynayay qormooyinka looga hadlaayo MIDABBADA waxaan ogaaday qolo walba

midabbka eey jecel yihiin ayeey magacyo badan ubaxsadaan. Somalida GEELA iyo xoolaha ayeey aad ujecel yihiin .

dhaqanka dhinaciisa hadii leeskula laabto, Ubaxyada magacyadooda 100 xabo kabadan

cid xifdisan inaan lasoo helin ayaa suuragal ah.

#Deegaanka iyo midabbada.

-Abwaan walba oo afka soomaliga ku gabyay waxuu adeegsadaA ereyo Somalida weligeedba adeegsan jirtay

wax cusub afka kuma soo kordhiyo ayaa lasheegaa. culimada ku hoowlan hormarinta midbbada

iyagana midab cusub sooma kordhiyaan laakiin midab horay ujiray ayeey kaamida ku soo dhaweeyaan

kadibna inta rinjiyo isku walaaqaan ayeey suuqa keenaan midabkaas mid u eg.

taas waa aragti , waxaa kasoo horjeedo aragtikale waxeeyna leedahay ABWAANADA afka ayeey hormariyaan ereyo cusub ayeey kusoo kordhiyaan , sidaas waxaa lamid ah culimada sanco-yaqaanada ah ee MIDABBADA ku hoowlan. 4K, 8K ayaa ka danbeeyay , 20,000 midab wax kabadan ayeeyna aqrin kartaa shaashadaas.

Abwaanada hoowl ayaa utaalo ah hormarinta afka hooyo,

macdanta qaaliga ah waa noocyo badan yihiin kalana midab duwan yihiin weyna kala qaalisan yihiin , hal magac oo afsoomaali ah oo loo adeegsado dhagxaantaas qaali ah kuma arag afka hooyo, Badweeynta Luul iyo yaaquut ayaa laga dhex helaa, Buuraha dahab iyo dheeman ayaa dul dhooban ,macdan walbana magac manoo lahan !.

(Murriyo/murriyad=kuul dahab ah)

#Gabyaaga markuu damco,maanso tirinteeda , (ABCD) Alif

ilaa YA ,xuruuftaas ayuu xaraf kasoo xushaa

xarafkaas ayuuna ka gabyaa,[Yeen, Geen,Ceeyn iwm.]

-labaatan kun oo midab wax kabadan ayaan kasoo xulanay midabbadaas aan kuu soo bandhignay,

sida badan waa asalkii midabbada.

-qofwalba oo naga mid ah (ID/aqoonsi) ayuu sitaa , hadii laga hadlo deegaanka magaalo.

xoolaha aan dhaqano maanta waxaa lagu kala gartaa sumad ama dhegta ayaa uduleesho nambar ayaana ugu dhegan hala soo fiiriyo, nambarkuu wataa neefkaas ayaa ladhahayaa.

-WADO KALE AYAAN JIRIN,OO RINJIGA LAGU KALA SOOCI KARO, AANAN KA EHEEYN IN SUMAD LOO SAMEEYO.

-Qaamuus midabbada nambaradooda lagu kala qeexayo weli lama qorin,qof kaligiis hoowl intuu qabto

haduu suuqa keeno cid cilmigaas dhaqan gelineeyso ayaanan jirin , wadada furan ayaa ah

ururada jaamacadaha inta isku tagaan in eey hoowshaas qabtaan , hirgeliyaana.

1000 midabb magacyadooda ,sumad ama nambaradooda, suuqa somalida waa in lagahelaa.

#muuqaalka cuntada iyo midabbada.

waxaan aragnaa meelaha cuntooyinka lagu soo bandhigo tartamada looqabto ,cunto karinta dadka kutaqasusay, waxaan aragnaa iyagoo

mudnaanta koowaad lasiinaayo muuqaalka cuntada,cunto aanan midab-dilneen iyagoo soo bandhigaayo ayaan shaashadaha ka daawanaa,

bulshada waan uga digayaa arinkaas in eey kusirmaan, Dacarta waa midab qurxoontahay laakiin weey qaraartahay , Timirta & Ubaxa weey kala

qurux badan yihiin hadana kala dhedhen wacanyihiin. marka aan wax ku miizaamo dhadhankeeyga, laga yaabee

shinbiraha qaar in eey jecel yihiin quudashada Ubaxa, cayayaanka qaarna kuba noolyihiin sida shinida,

malabka macaan suubiso,

suugaanta aadka loogu amaanay MALABKA DOOCAANKA, ayaad ku dhex arkeeysaa , Doocaan= buur kutaal dalka Cumaan ayaa ladhahaa, Doocaan.

dhibka Abwaanada somalida heeysato ayeey kamid tahay oo dalkooda nimcada laga helo uma hiloowaan ,

hadba meesha eey markaas joogaan maahee meeshii kafog ayeey kuu amaanaan ,maanta haduu UK degan yahay laga

yaabee deegaanka Somalida

geeska afrika inuu gabay kuugu amaano , daltabyo darteed ayeey katahay amaanta. waana cudur dadka ku dhaco , dalxiis ayaana udaawo ah ,

haduu fasax usoo aado deegaanka Soomaalida durba waaba kan kuu amaanaayo UK .

Dahabada dhoowrka da`ood udhashay ee ku ag duqoowday aad uma amaani yaqaano laakiin shalay intuusan naagba guursanin aadbuu Dumarka u amaani yaqiinay.

-maxaad afkaaga ugu labeeysaa ABWAANADA?.

-jawaabta waxeey tahay Abwaanada Afkaan iyaga ayaa iskaleh cida aan dooneeyno ineey naqalad saxdo waa iyaga, Suugaanta inta curiso

waa iyaga , sax iyo qalad miisaanka leeskula laabto iyagaa noo ah,qolada aad suugaantooda xiiseeysid dhaliil hadii aad ku aragtid inaad sheegtid ayaa haboon.

-Nin&naag inta nool aduunyada qofwaliba jir HOOYO ayuu soo dhex maray.

#Quraafaadka cilmi nafsiga dhanka midabka.

dharkA aad kusoo lebisatay qoom walba dhaqankiisa ayuu kugu amaanaA ama kugula yaabaa.

horaa looyiri "NINNA SHAAH BUU SHUBAN WAAYAY , NINNA SHAATIGAA KU YARAADAY".

Afrika ayeeynu ku noolnahay shaqada maalina waa la helaa maalina lama helo, waa marka loo hadlayo dadka

aanan jeebkooda buurneeyn.

laga yaabee in dal hormarsan aad ku nooshahay hadana meel tuulo ah kaga nooshahay

hal bacadle ayeey leedahay tuuladaas ,halkaas bacadle sanadkiiba halmar ayaa loo soo adeegaa ,dharka xiligaas lakeeno ayaa sanadka dhan lagu dhex iibiyaa Bacadlahaas.

wiilka ama gabadha tuuladaas degan waxeey ku qasbantahay in eey kasoo iibsato waxa suuqaas dhex yaalo

midabbada meesha lagu haayo ayeeyna mid kadoorataa.

duruufta dadkaas aan kaaga waramay, hadii aad cilmi nafsi ku dhistid soow doqon-niimo maahin ?.

hebel midabkaas ayuu jecel-yahay, mar walbana waa kusoo lebistaa, saas aawadeed nafta ku jirto waa nuucaas.

cilmiga nuucaas ah waa cilmi dhinac ka raran.

#BulshadA aad lanooshahay dhaqankooda waa ku saameeyay.

tusaale, inaga Somali baanahay , marka laga hadlaayo , kushiinka, Hooyooyinkeena shaaha waxeey

noogu deri jireen Heeyl iyo Qorfe , shaahaas carafta badan cabistiisa Somalida weey jeceshahay ,

kuwii dhaqanka lagu soo barbaariyay, laakiin shaashaas carafta badan Bakeerigii lagu soo shubay

hadii oow kaaga soo carfo Cadar sida badan waan dhibsanaa, sabab kale maahin waxa keenaayo ayaa ah

Hooyooyinkeen ayaanan nagu soo barbaarinin sidaas.

Bulshooyinka caalamka qaar ayaanba ka helin shaah Heeyl lagu daray waayo waanan lagu soo barbaarinin sidaas.

miisaanka nuucaas ah ku miisaan midabbada , laga yaabee HooyadaA ama Aabahaa dhaqan gaar ah in eey kugu soo barbaariyeen

dhaqankaas dalkiina ama bulshadiina ugaarka ah hadii aad rabtid in Aduunka oo idil laga hirgeliyo

macquul ma`ahan midaas, midabka adiga kula fiican laga yaabee in hebel uuba ka helin .

Abwaan Gaariye mar oow ka hadlaayay Suugaanta, waxaa hadalkiisa kamid ahaa,

gabayada qaar waan ku dhega barjoobaa. waxuu ula jeeday , Liin+ caano dhaay ah =caano baqay.

sidaas oo kale miisaan ayaa jiro midabbada leeyihiin ,Liin& caano intaadan isku walaaqin marka hore macalin doono ku

kala baro midabbada.

midna aan kuu sii raaciyo ,midabbada qaar waa lagu indhabarjoobaa.

Aadanaha haku kala gedisnaado dhaqanka laakiin quruxda qaabka oow u arko meelaha qaar leeskuma qilaafin , dhuxusha waxeey u midab egtahay , Dhiiga nagu jiro , sax miyaa sidaas ?. may sidaas waa qalad.

Caanaha dhaayda ah iyo Suufka (Cudbi) waa isku egyihiin, sax miyaa sidaas. haa waa sax.

Daa-uuska waa qurxoon yahay, dadbadan taas ma diidana.

Malabka shinida waa macaan yahay iyadana lama diidana.

---

dad aqoonyahano ah wax indhahooda la horkeeno aqristana la dhaho ma ahan sheekadaan laakiin

iska aqrista .

hada kahor WARAABE ayaa la weey diiyay Caano mataqaanaa, haa ayuu ku jawaabay, saalayiri midabkooda noosheeg, suuyiri waa MADOOW yihiin.

sheekada Waraabaha halkaas ku jooji waxaan ku su`aali lahaa, CADAALAD , midab maleedahay

midab uyeel hadii lagu dhihi lahaa midabkee ayaad siin laheeyd CADAALAD?.

Guduu, cagaar, Madoow, Jaale, Cadaan, Buni, Basali,Dahabi.

inta midab ee dunida laga helo mid dhalada kasoo dhex muuqday iyo mid dhab ahaan loo taaban karo

midabkee ayaad siin leheed Cadaalad.

midabbo isku dhafan ayaan aragnaa waana QAANSA ROOBAAD laakiin midabbadaas waa qabyo waxaa ka maqan midabka madoowga, midbka cadaanka, dahabiga,qalinka,iwm.

qof ahaan midabkee siin laheeyd Cadaalad?.

---

waxaa ii muuqdo in erey bixinta midabbada inuu gaabis kajiro siiba Soomaalida dhexdeeda,

midabka biyaha Maanyada waxaan dhahnay BAXRI waxaan ula jeednaa , waa midab cagaar-biyabiyo ah

laakiin , gudcur haduu yimaado BAXRI waa is bedelay , Lafcirna mugdi ayuu isku bedelayaa.

#Laqanyo saliidbaa leh .[laadadyo/ladaadyo]

Somalida reer xeebeedka ah hadii aadtahay laga yaabee in aadan ku laqayoonin Wanka barida weeyn

subagiisa, Leg iyo bari inaad cuntid waa iska macquul xoogaa kadibna kusoo dabaalatid Bada

kana soo baxdid adiga oo baahan , laakiin marka magaalada lagu noolyahay subaga badan lama jecla,

sidookale waayeelka Caanaha baraxA ayuu jecelyahay , suugadana mida yaanyada aadka looga badiyay

gaduudka rasiinka ah lama jecla ,dadka qaar dhaqankooda ayaa sidaas ah.

bal aan kasoo laabano dhanka kushiinka ,ukaalay farshaxanka iyo dhar qurxinta.

macquul matahay in lagu laqanyoodo midabka rasiinka ah , sida Buluugtiq ah , cagaar,rasiin ah iwm.

sax iyo qalad aniga koleey dhax dhexaad ayaan ka ahay arinkaas .

waxaan arkaa kuwa hormuudka u ah reermagaalka in eey jecel yihiin in eey ku lebistaan dhar midabkiisa

meel dhexaad yahay , ninka shaatiga jaalaha ah wato ee halkaas maraayo , dhar aanan la dheheeynin in eey

ku lebistaan ayaa ii muuqato.

Somalideena ceeb uma aragno in qofka oow ku lebisto Shaati midabkiisa hurdi yahay . shaati (Pink) ah dumarka ayaa lasiiyay. shaati midabkiisa Xabxabi yahay (basali)hadii aad ku lebisatana safka kabax cidna kuma dheheeyso dunida reer galbeedka.

#FARTA FARSHAXANKA MAXEEYTAHAY?.

Guri walba midabgaar ah ayaa lagu qurxiyaa rinjigaas marsan guriga haduu yahay

midabbo kala duwan, midabbadaas waxeey lamid yihiin (ABCDE) sidaas ayaa lagu aqrinkaraa.

-Reergalbeedka dalalkooda, adigoo gaari saaran maku aragtay gidaar midabbo farshaxan

ka muuqdo lagu qurxiyay?. farta farshaxanka waataas.

-farta farshaxanka leeyahay ,midab walba oo rinjiyada leeyihiin waxeey utaagan yihiin xuruuf.

cilmigaan cusubna waxuuuba xooga saarayaa sida aan kuu fahamsiin leheen arinkaas.

#FARSOOMAALI, tii hore ayaaba la hormarin waayay maxaad suuqa ukeentay mid cusub?.

wax qurxin ayuu yahay ujeedka, lagana guuri maayo farteena .

Muusiga qaab gooni ah ayaa loo qoraa , far ugaar ah ayuu leeyahay hadii aanan qaldaneeyn

waloow aanan aqoonin qaabka loo qoro fartaas laakiin waxaan ujeeday Buugaag leeygu sheegay

waxaa ku qoran Farta muusiga. maxaa diiday in FARSHAXANKA FAR UGAAR AH LOO SAMEEYO?.

jawaabta waxeey tahay waxna .

#Dhaqanka bini aadanka. shanfaroodle waxuu hishiis ku yahay cilmiga inuu noqdo

mid xor ah. xisaabta iyo xuruufta (ABCDE), macalinkii kubaray fikir kiisa kaama oowsan iibinin.

macalinkii ii bilaabay afcarbeedka cusub barashadiisa (Macalin caana-geel)ayaa dhihi jiray sidaas .

aqriste waan kaaraali gelinayaa midaas, xeerkii larabay in wax loo qoro waan kayara leexanay.

#Dadkaan Dahab & doolar ayeey daba ordaan.

-Fartaan farshaxanka loohabeeyay lacag malaga helayaa?.

haa weeye jawaabtu.

-fikrad cusub marka suuqa lakeeno in dadka laga iibiyo, xoogaa waa yara dhib.

qaabka qarash looga heli karo hadii aan kuu tilmaamo.

1- waa in aad soo daabacdaa midabbadaan , kana dhigtaa sida Turubka .

dusha sare yaanan la kala garanin.

qofka hadii labaro loosharaxo , waxuu isku deyi karaa inuu

lasoo baxo magaciisa oo midabbo ah.

Turubkaas xafiiska ayaa la dhigan karaa waa sheey qurux badan waana midabbo kala jaad ah .

guriga ayaa ladhigan karaa , qof marti ah haduu kuu yimaado ayaad usharixi kartaa .

dabcan ashqaraar ayuu ka qaadayaa markuu arko magaciisa quruxda uu leeyahay .

- mishiinada wax lagu daabaco tayadooda.

shey walba kan ugu qaalisan ayaa ugu tayo wacan ,waayo waqti badan ayeey qaadatay sameeyntiisa, mishiinada wax lagu daabaco wey kala tayo fiican yihiin , madbacada buugaagta lagu daabaco mishiinada eey isticmaalaan ayaa ugu fiican.

-qaanuunka (RGB/CMYK) midab walba sumada lasiiyay inaad daabacato ayaa wanaagsan .

hadii kale qof walba intuu rinji walaaqdo ayuu ku dhahayaa kan ayaA ah midabkaas, kolkaas ayaa leesku qaldayaa , Jaale iyo hurdi.

- maxaan umaalgelin waayay fikradaan?.

hadii aan maalgeliyo waxaa qasab ah inaan dulsaaro xuquuqda

lahaanshada fikirka, iyo daabacaada.

beryahaan danbe qofkii maqaalyar meel ku qoro, shaabad ayaa udulsaaran , yaanan leeyga taabanin

maqaadan kartid ma faafin kartid ayaa ugu qoran qeeybta hoose.

#Midabka madoow.

adeegsigiisa naguma badna , farta farshaxanka laba meel ayuu kaga soo muuqday , sibidhi/shamiinto iyo madoow caadi ah.

sababta aan uga soo tagay waxeey tahay ,midabkaas waa midabka hurdada, mugdi haduu yimaado hurdo ayaa dadka qabato.

-dhamaan midabbada, NAL Guluub ahaan haloodaaro hadii la dhaho, mid iftiin badan ma noqon doono midabka madoowga ah .

-midabka madoowga ah waa midabbka isku naxariisashada.

somalida waxeey dhahaan "waa ilmadoowe iska daa xoolaha"

-midabka madoow inuu yahay midka ugu quruxsan CARABTA ayaa arinkaas nala qirsan, bal ufiirso gabadha carbata ah CABAAYAD MADOOW ayeey ku lebisataa ,quruxda eey qabto midabka cabaayadaas ayeeyna ku jeclaatay.

-cunsuriyad naguma jirto, xaashaaye qofka qalinkaan wax kuqoray ayaaba ah qof madoow ah,abkiis iyo isirkiisana kasoo

askunmeen madoow.

midab gaar ah oo mudan in lanaco ayaan jirin.

-dhul labeerto dhoobeey ayaa ugu wacan , midabkeedana waa madoow.

-balanbaalista baalasheeda qurxoon ,midabka qaxwiga ah +madow ayaa quruxdaas uyeelay.

-amaan darteed cilmi loo curiyay maahan kan , waa cilmi ujeedkiisa yahay midabbada haloo adeegsado ALIF-BEETO AHAAN .

==========

#bulshada geeska degan, carab +uk +fr +it+ turki.

intaaba saameen beey nagu yeesheen af ahaan

waa inaan wax ka tilmaamaa, afafkaas somalida saameenta ku dhex leh .

#Midabbada magacyadooda

Ingiriisi & afka Turkiga & Afsoomaali

Color — renk.

Red — kırmızı —casaan

Orange — turuncu.—liimi

Yellow — sarı —huruud.

Green — yeşil.—cagaar.

Blue — mavi.—buluug

Purple — mor.—carwaajis/cinabi.

Pink — pembe.—basali.

#Midabbada magacyadooda

afka Faransiiska.

red – rouge.—casaan

yellow – jaune.—hurdi

blue – bleu/bleue.—lafcir/beeymadoow

green – vert/verte.—cagaar

orange – orange.—liimi

white – blanc.—blanche.—cadaan

black – noir/noire.—madoow

gray – gris/grise.—sibidhi.—ciiraboos

#Midabbada magacyadooda

afka Talyaaniga.

Arancione —Orange.

Giallo —Yellow.

Rosa —Pink.

Rosso —Red.

Nero —Black.

Marrone —Brown.

Verde — Green.

Blu — Blue.

#Somalida dhulka lagama soo qodin sida dheemanka ,

dadbeey ladhasheen walaalo yihiin .

buuni loogu yimaado cilmiga afka somaliga ma ihi laakiin

arday uhamuun qabo barashada afka hooyo ayaan ahay.

macluumaad yar oo aan soo uruuriyay ayaan idinla wadaagayaa .

Afsomaliga cida uu ladhashay idinka ayaa sheegi doono , gartaasna aqristaha ayaan u daayay .

---

qoom mel degan oo ilbaxnimo fog leh waxaa lagu ogadaa magacyada xisabta & malmaha & midabbada magacyadooda & buugaagtii eey qoreen jiilashii hore.

soomlida xeebdegitaanka ayaa loo aaneeyaa in afkooda ka lumo.

#ha la mataaneeyo magaalooyinka.

midba mida eey udhawdahay la mataaneey .

muqdisho, madakaskar la mataaneey

kahor inta aanan lala mataanoowin Mambaay.

#Afar/Adali/Cafar.

#CANFAR.Midabbada.

Luqada CANFARTA , (A-B-C-/TBJ.)

wax walba waxeey iskaga mid yihiin afka somaliga

alifbeeto ahaan hadii loo eego.

shaqalada waan iskaga egnahay ,shaqal dheer ama shaqal gaaban isku sibaan u aqrisanaa.

shibanayaashan sadaxda ah ayeey nooga duwan yihiin .

C=XAA

Q= CAA

X=DHAA.

---

dheeman qor afka canfarta waa sidan .

(xeeman./x=dha)

---

cigaal =Qigaal.

#Canfrta af ahaan marna waan isku soodhacnaa marna wadada ayaan ku kala leexanaa

taas macnaheeda maahan hala mideeyo afafka. hadii la midoobo luqad dhan ayaa dhimaneeyso, erey jiray halaga tago waa waxa uga xun af ahaan

---

caanaha geel weey cad yihiin, hooyana sidaas beey ula baxdaa wilkeda canageel.


canfarna sheeyga cad wexeey dheheen (Cado/cidi)

[canfar ahaan qaabka loo qoro :Qado/qidi/ idi]

Somalida, bil 14 jirsatay cadi beey dheheen.

sheeyga cadna cadaan baa layiri.

Aqriso shaxdan hoose. /Q=C



Afaraf	Afaan Oromo	Afka Somali	English
Qado[1] qari	Mana **adi**	Guri **cad**	A **white** house
Xer numu	Nama **dhera**	nin **dheer**	A **tall** man
Qasa sagá	Sa'a **diimaa**	Sac **guduuda**	A **red** cow

#Midabbada magacyadooda af-canfar.

-karracinan= Carwaajis/cinabi.

-walqi= basali.

-diti /data=madoow.

-culbinan. = cagaar.

-inxixi= indhidhi/ andhadhin = cagaar

-qidi= cidi/ = cadaan

-bunni= qaxwi

-Burraacinan/burraacin = buraaxinaan = Dambas

-qisi=cisi/casa= casaan.

-hurdi= Hurdi

-bulci=bulxi= buluug

-culbinan=cagaar.

-Bunni,dubni,dubninan,caawinan,gudminan=Qaxwi.

-balqinan=balicnaan = midabka liimiga ah / liimi .

-walqin/walqinan = walcin /walcinaan = basali.

-karracinan=karaaxin = carwaajis

{qabiilka, SAHO, kuwaas canfarta ayeey wadaagaan midabbada ,wax eey kukala duwan yihiin ayaan jirin.afka canfarta , kan somalida, kan Saho, dhamaantood waa is leeyihiin .}

==========

#Canfarta & Somalida yaasaxan labadooda ?.

sheeyga cad waxeey dhahaan ,Cado/ cidi/idi.

sheeyga guduudan waxeey dhahaan , cisi/asa/isi/ashkir.

sheeyga huruuda ah waa hurdi.

sheeyga buluuga ah waa BULXI/BULHI.

-su`aal, ma inagaa dawgii saxnaa ka leexanay oo afkii toosnaa lu minay mise

canfarta ayaa jid qaldan mareen ?.

waxeey ila tahay inaga ayaa ah kuwa afkoodii lunshay af shisheeye, inagaa adeegsanay.

Afsoomaaliga malaga helayaa ereyga (BULXI).

haa waa laga helayaa laakiin adeegsiga ayaa qaldan .qaamuuska waxaa noogu dhigan .

bulxan/bulxamid=Cod nafley badani isku darto oo

farxad iyo qosol leh.

Bulxan =hadal iyo qosol badan oo farxad ku jiro/wirix.

-Shinbiraha bulxamidooda.

Somalida wiilashooda Bulxan ayeey magac uga dhigaan.

-Cade/qaaje/sugul/gaduudoow/boore.maariin.iwm.

intaasba waxeey tilmaamayaan midab.

Bulxan in loola jeeday wiilka indhahiisa buluuga yihiin ayaa suuragal ah.1000 sano kahor sidaas inuu dhaqanka ahaay waa suuragal.

#Qaamuuska Keenadiid sida ku qoran.

(Qaamuus afsomali ku qoran midkii ugu horeeyay .isaga ayaana ah kan ugu sahlan cid walbana fahmi

karto. iska jir qaamuusyada. Google xayeesiiso beryahaan danbe,qalad kooga ayaa badan.)

Buluug= wax midabka cirka leh.

lafcir/beeymadoow.

-Beeymmadow=beey madoowga ku badan yahay / lafcir/buluug.

-Beeyo= xabag kolkii lashido aad u udgoon /mayddi.

-foox /beeyo/luubaan=Xabag laga helo geedaha qaarkood,

sida maydiga oo loo shito udgin.

[-cunaabi = Kuul laga sameeyey xabagta maydiga oo la warshadeeyey oo dumarku qoorta ku xirtaan.]

Somalida asal ahaa midabwalba waxuu kasoo biloowdaa

Beey/ foox/luubaan .

beeymadoow.

beeygaduud.

beeycadaan.

beeyhuruud.

sidaas ayuu dhaqanka ahaay.

taas waxaa udaliil ah, biyaha midabkooda waa madoow yihiin beey dheheen.

-Beeymadoow ayeey dheheen sheeyga buluuga ah .

hadii aad isku darsatid natiijada kaaga soo bexeeyso waxeey

noqotaa somalida asal ahaan midabkaan BULUUGA AH waxeey utaqiinay BEEYMADOOW.

-cirka midabkiisa waa madoowyahay

ayeey dheheen jiilkii hore.

waxaa dhigana-yaashooda kamid ah "cirkoo madoow ah aanan caad leheeyn "

Cirka midabkiisa waa madoow+Biyaha midabkooda waa madoow.

sidaas ayeey aamin-sanaayeen jiilkii naga horeeyay.

OROMO.Midabbada.

Halluu=Midabbo

Ingiriis	**Afaan Oromoo**
Black	Gurraacha
Red	Diimaa
White	Adii
Pink	Diimadii
Maroon	Diimgurraa
Purple	Bildiimaa
Scarlet	Dhiilgee
Green	Magariisa
Blue	Cuquliisa
Orange	Burtukaan

Lime	Asheeta
Aqua	Garsamii
Amber	Arfaasee
Grey	Daalacha
Brown	Boora

#fariid nimada Soomaalida.
afkooda meel walba waa geliyeen, Oromada oo katirobadan, afkooda weli g00gle kuma heeyno.
Afafka ugu caansan caalamka, Qaamuusyadooda waa la helayaa iyagoo Afsoomaali ku qoran .
waloow aanan weli arkin qaamuuska afka Shiinaha.

#afkaan haloosoo adeego ayaa ladhahay.
dadkii qoray qaamuusyada.
